

Sharciyo cusub mar haduu cudurkii ku badanayo gobolka

Hadda waa in aan dhamaanteen iska caawinaa joojinta fiditaanka cudurka.

Nooca fiiriska ingiriiska ayaa hadda gobolkeena ku badanaya, waa nooc si fudud oo dagdag ah u fida. Sidaa awgeed baa sharciyo cusub oo adag loo soo rogay markale. Waxay bilaabanayaan 1-abriil ilaa 16 maajo. Xataa hadda da'yarta ayuu ku dhacaa, inyar bay xanuunsadaan laakiin cudurkeey fidiyaan. Marka qof waliba uu raaco xeerarka unbaan fidida cudurkan hoos u dhigi karnaa.

Dugsiyada sare wax barashadu waxay isugu jiri doontaa mid caadi ah oo iskuulka ka dhacda iyo mid masaafo dhigasho ah oo ardaydu guryaha joogayaan.

Waa inaad isticmaashaa af-xidhka haddii meel ciriiri ah aad tagayso. Xeer cusubna wuxuu leeyahay waa inaad MAR WALBA xirantahay af xiradkadhaddii aad bas ama tareen raacayso. Ogow af xiradku inyar unbuu caawiyaa ee haku badalin kala fogaanshaha. Isticmaal af-xirka marka qura ah, ee la aqoonsanyahay.

Haddii aad xanuunsato waa inaad ku ekaataa guriga isna baartaa. Waxaad wici kartaa xarunta caafimaadka oo dalban kartaa baaritaan. Amaba ka dalbo 1177.se. Haddii aad xanuunsantahay waa in dhammaan dadka guriga kugula nool ay guriga ku ekaadaan. Inkabadan shan meel ahaan amaba (21,7 %) dadka waaweyn ee gobolka kalmar, waa la talaalay. Marka dadkoo idil la talaalo baa arrintu fudu daanaysaa. Dhakhtaradda cudurada faafa Lisa Labbé Sandelin, ayaa codsanaysa in aan in yar dulqaadano. Af xidhku inyar buu wax taraa markaa haku badalin kala fogaanshaha.

Xarumaha talaalka ee cusub ayaa si dhakhso ah u talaali kara

Hadda laba goobood oo waaweyn oo talaalka ah baa laga sameeyey gobolka mid waxay ku taal magaalada Västervik midna Kalmar. Markuu talaalku yaalo, waxbadan baa la talaali karaa si dhakhso ah. Laakiin weli waa in waqti la samaystaa, da'duna waa inay sax tahay. Marka waqtigaada lasoo gaaro ayaad balan ka samaysan kartaa , xaruntaada caafimaad ama goobaha talaalka. Laakiin hadda dadka warqadda ka helay gobolka Kalmar unbaa waqti samaysan kara.

Waxaa ugu haboon inaad balanta ka sameysato 1177.se, laakiin waad wici kartaa xarunta caafimaadka Marka dadka da'doodu 60 jir ka weyntahay ay is wada talaa laan, baa dadka intiisa kale ballan samaysan karaan. Wax warqad ah oo lasoo dirayo malaha. Waxaadse arki doontaa ol ole iyo xayeysiin. Anagana qoraalkeenan ” Maxaa ka cusub karoonaha” ayaan kusoo qori doonaa.

Ka qayb qaado Språk-café oo internetka ah!

Maalmaha talaadada ah maktabadda iyo ururka ”saaxiib Iswiidhan” waxay qaban qaabiyaan waxbarasho luqadda Iswiidhishka ah oo interneetka ku baxda. Waxaad kubaran kartaa luqadda adigoo lahadlaya dad kale oo tereenin samaynaya. Waa inaad is diiwaan gelisaa. Kadib blinkiga Zoomka ayaa lagu siinayaa. Waxaad isticmaali kartaa kombiyuutar, moobiil iwm ah.



Ku toosi kaamirada kodka-QR meeshaas baad ka heleysaa macluumaad dheeri ah (waa af iswiidhish)

Caawi dukaamada-Soo adeego keligaa mar walba

Dukaamada ma ogola in dadbadan yimaadaan. Gobolka ayaa hubinaya in dukaamadu sharciga raacaan, laakiin macaamiishana waa in caawiyaan. MARWALBA keligaa soo adeego! Dabcan ilmo yar waad sii wadan kartaa, laakiin saxiibkaa ama saygaada/xaaskaada ka codso inay dibadda kuugu sugaan.